

Pratt Community
School
Buug-gacmeedka
Waalidka/Ardayda
2025-2026



66 Malcolm Ave SE
Minneapolis, MN 55414
612-668-1122
Mr. Burgess, Maamule
Pratt.mpsschools.org

BAYAANKA HALWGALKA DUGSIYADA DADWAYNAHA MINNEAPOLIS

Dugsiyada Dadwaynaha Minneapolis waxay u jiraan inay siiyaan waxbarasho tayo sare leh, la dagaalanta takoorka, dhaqan ahaan habboon arday kasta oo reer Minneapolis ah.

Bayaanka Hawlgalka Pratt Community School

Pratt Community School wuxuu xoojin doonaa wax iswaydiinta, dareenka wax ogaansho, iyo filashooyinka sare si markaa arday kasta u noqdo sidiisa ugu fiican adduunkeena dhakhsaha isku beddelaya.

Bayaanka Himilada Pratt Community

Pratt Community School wuxuu u jiraa inuu abuurto bulsho faraxsan taasi oo aqoonsiga la sharfo oo caqli badnidana la beero.

Saacadaha Shaqada Pratt Community School

Fasalada High 5 - 5 8:05 gh ilaa 2:45 gd.

Pratt Motto

Wadajir Ayaa Meel lagu Gaaraa

***Fadlan Ogow: Ardayda waxa lagu martiqaaday dugsiya inay yimaadaan 7:50 g.h.
Macallimiintu ma joogaan si ay ardayda u ilaaliyaan wakhtigan kahor.***

LAMBARADA TALEEFANADA

Xafiiska Guud	(612) 668-1122
Xafiiska Caafimaadka	(612) 668-1124
Macluumaadka Guud ee Xafiiska Degmada	(612) 668-0000
Xarunta Meelaynta Ardayga	(612) 668-1840
Gaadiidka	(612)668-2300

KASBASHADA

Dugsiga waa shaqada ilmahaaga! Ilmahaagu wuxuu halkan u joogaa inuu barto wax si uu u gaaro dhammaan guulaha uu gaari karo. Tani waxay dhacdaa markaynu wada shaqayno si aynu u taageerno baahiyaha tacliineed iyo bulsho-dareen. Markaad ka caawinayso ardaygaaga raacidda talooyinkan, si aad ah ayaad u hagaajin doontaa fursadaha inuu tacliin ahaan guulaysto. Ardayga guulaystaa wuxuu awoodaa inuu:

- ❖ Wakhtiga loogu talagalay baska raaco, dugsiga yimaad, oo fasalka xaadiro.
- ❖ U diyaarsanaado xiisadda. Dugsiga la yimaaddo agabka daruuriga ah, sida shaqada guriga iyo islibyada oggolaanshaha.
- ❖ Caawimo codsado haddii uu wax fahmi waayo.
- ❖ Ka qaybqaato wada-hadalka iyo hawlaha fasalka.
- ❖ Ka shaqeeyo dhammaan shaqooyinka loo diro.
- ❖ Shaqada ku ekaado. Wakhti si habboon u isticmaalo maalintii.
- ❖ Shaqadiisa qabto—oo uusan qish samayn.
- ❖ Dadaalo oo fasal kasta dadaalkiisa ugu badan sameeya.
- ❖ Ilaaliya dhammaan agabka dugsiga: buugaagta, agabka, Chromebook-yada/iPad-yada.
- ❖ Masuuliyadda habdhaqankiisa qaato. Hadduu sameeyo qalad, wuxuu aqbalaa masuuliyadda oo waxbuu ka bartaa.
- ❖ Masuul ka noqdo ku dhaqanka xeerka iyo ogaanshaha filashooyinka dugsigiisa.
- ❖ Caafimaad qab ku joogo, hurdo ku filan helo, oo si fiican wax u cuno.

Filashooyinka Dugsiga oo Dhan:

Filashooyinku waxay qeexaan yoolasha habdhaqan ee ardaydeena. Marka ilmahaagu qaangaaro, waxa iyaguna qaangaara filashooyinka habdhaqanka. Waxaanu dhiirigelinaa koboc bulsheed oo togan halkan Prat anagoo u sheegayna ardayda inay:

- *Ixtiraam Yeeshaan
- *Xilkas Noqdaan
- *Badqabaan

Xaadiritaanka

Dugsiyada Dadwaynaha Minneapolis waxay aqoonsan yihiin in xaadiritaanka maalin kasta uu muhiim u yahay guusha tacliineed. Waa yoolkayaga inaanu la shaqayno ardayda, qoysaska, iyo bulshooyinka si aanu u taageerno xaadiritaan dugsi oo joogto ah una hagaajino kasbashada tacliineed. Yoolkayaga xaadiritaanka ee degmadu waa 95% ama ka sii fiican.

Waa Sharci!

Sharciga Minnesota wuxuu dhigayaa in ardayda oo dhan looga baahan yahay inay xaadiraan dugsi laga bilaabo toddoba jirkooda, ama marka la qoro dugsiiga Barbaarinta (kii la rabo ha soo horreeyee), ilaa intay ka gaarayaan 18 jir. Ku guuldarraysiga ardayga ee inuu xaadiro dugsiiga waxay horseedi karaa tallaabo sharci ah oo laga qaado waalidiinta/masuulada iyo dugsiiga.

1. **Waalid/Masuul:** Fadlan wac ama u soo sheeg dugsiiga haddii ilmahaagu uusan soo xaadirayn. Hubi inaad sheegto magaca ardaygaaga, magaca macallinka, iyo sababta maqnaanshaha.
2. **Cudurdaar Qoran:** Marka ilmahaagu dugsiiga ku soo laabto, fadlan soo dir cudurdaar qoran oo uu saxeexay waalidka/masuulka. Ku dar magaca ardayga, taariikhda ardaygu uu maqnaa, magaca macallinka, iyo sababta maqnaanshaha ama daahitaanka.
3. **Maqnaanshaha Cudurdaarka leh:** Ku dar jirro, xus diimeed, xaalad gurmada oo qoys, ama cimilo daran. Ballamaha dhakhaatiirta ilkaha iyo kuwa kale waxa kaliya loo cudurdaaraa marka la helo qoraalka dhakhtarka.
4. **Maqaanshaha Aan Cudurdaarka Lahayn:** Maqaanshaha ilmuhu cudurdaar yeelan maayo marka:
 - a. Dugsiigu uusan ka helin qoraal ama wicitaan taleefan waalidka.
 - b. Sabab cudurdaar leh aan la siin maqaanshaha.
 - c. Ardaygu ka tago dugsiiga ama dhulka dugsiiga bilaa idan.
 - d. Ardaygu joogo dugsiiga laakiin uusan xaadirin fasalka uu lahaa.
5. **Ka Tagista Dugsiiga Xilli Hore: Fadlan u soo dir qoraal ama wicitaan xafiiska ugu dambayn 12:00 GD,** haddaad ku qasban tahay inaad ilmahaaga dugsiiga ka qaaddo kahor rawaxaadda. Ilaalinta iyo badbaadada ilmahaaga dartood, waxa waajib ah inaad timaad xafiiska oo aad saxeexdo bixitaanka ilmahaaga! Cid kasta oo codsanaysa inay dugsiiga ilme ka qaaddo waxa la waydiin doonaa aqoonsi (ID). Magacu waxa waajib ah inuu ka muuqdo kaarka xaaladda gurmada ah si aanu ilmaha ugu sii dayno.
6. **Soo Buuxinta Wixii Dhaafay:** Ardayda waxa laga filayaa inay soo buuxiyaan shaqada iyo layliyada guriga ee ay ka maqnaayeen.
7. **Daahitaanka:** Ardayda waxa laga filayaa inay fasalkooda joogaan 8:05 GH. **Ardayda aan fasalkooda joogin ugu dambayn 8:30 GH waxa loo tixgalin doonaa inay daaheen** (waxa ka reebban haddii ardayga baskiisu xilli dambe yimi). Ardayda xilli dambe yimaadda waxa waajib ku ah inay tagaan xafiiska si loo diiwaangeliyo. Waxa muhiim ah inay ardaydu dugsiiga yimaadaan xilliga loogu talagalay. Ardayda caadaysta daahitaanka waxa loo tixgalin googoys.



Taleefanada Gacanta, Taabletyada, MP3 Players... iyo Aaladaha Elektarooniga ah ee Shakhsiyeed ee kale Isticmaalka iyo Haysashada

Masuuliyadaha Waalidka

- Carruurta dugsiga hoose (fasalada K -5) lama oggola inay ku haystaan ama ku isticmaalaan aaladaha elektarooniga ah (taleefanka, taabletka, mp3 player, iwm.) dugsiga, baska dugsiga, ama socdaalada aqoonkororsiga ILAA OO waalidka iyo dugsiga ka heshiiyeen qorshe ardaygu ku haysan karo kuna isticmaali karo.
- Haddaad rumaysan tahay inay jirto sabab ilmahaagu ku haysan karo taleefanka gacanta ama aaladaha elektarooniga ah ee shakhsiyeed dugsiga, waxaad u baahan doontaa inaad Maamulaha idan waydiisato.
- Haddii ilmahaagu idan u haysto inuu ku haysto ama ku isticmaalo aaladaha elektarooniga ah ee shakhsiyeed dugsiga, waxa waajib ah inaad oggolaato qorshe aad isla diyaarisaan adiga iyo maamulaha oo ku saabsan isticmaalka habboon ee ilmahaaga oo ay ka mid tahay, laakiin aan ku koobnayn:
 - Halka aaladda lagu haynayo inta dugsiga uu joogo.
 - Waxay yihiin duruufaha keensanaya in ilmuhu aaladda isticmaali karo.
 - Muddada heshiisku soconayo.
 - Waxyaabaha ka dhalanayo haddii heshiiska lagu dhaqmi waayo.
- Bar ardaygaaga isticmaalka iyo haysashada xilkasnimada leh ee aaladda.
- Taageer shaqaalaha dugsigaaga hadii aaladda ilmahaaga lala wareego maadaama uu ku fashilmay inuu ku dhaqmo qorshaha lagu heshiiyey.
- La eeg isticmaalka habboon ee aaladda ardaygaaga sida ku qoran qorshaha lagu heshiiyey, iyo • ku dhaqanka masuuliyadaha ardayga. Aaladaha luma ama la xado qaar kale loogu beddeli maayo.

Masuuliyadaha Ardayga

- Kaga tag taleefankaaga gacanta ama muusig baleeyarka guriga haddii waalidkaa uusan qorshe la lahayn maamulaha.
- Kaliya isticmaal taleefankaaga gacanta ama muusig baleeyarka marka waalidkaa ama maamulahaagu oggolaado iyo kaliya
- sababaha ay u oggolaadaan.
- Ha u oggolaan ardayda kale inay isticmaalaan taleefankaaga gacanta ama muusig baleeyarka.
- Ku qaadin sawirro ama fiidyowyo taleefankaaga gacanta.
- Iska fogee taleefankaaga gacanta marka aan lagu oggolayn inaad isticmaasho sida qorshuhu dhigayo.
- Caawimaad waydiiso macalinka, maamulaha ama dadka kale ee waaweyn haddii aad wax dhibaato ah qabtid.

Masuuliyadaha Maamulaha

- Inuu u sheego Ardayda, Shaqaalaha, iyo Waalidiinta xeerarka Isticmaalka iyo Haysashada sanad kasta.
- Inuu kala shaqeeyo Waalidiinta dejinta qorshayaal gaar ah oo loogu talagalay isticmaalka marka waalidku codsado marka xaaladaha qoysku u baahan yihiin
- qaabilaado gaar ah.
- Inuu u sheego shaqaalaha heshiisyada la galay ee oggolaanaya haysashada ama isticmaalka.
- Inuu si joogto ah u fuliyo siyaasadaha degmada.
- Inuu ka qaado tallaabooyin edbined oo ku habboon ardayda ku fashilma inay u isticmaalaan aaladaha sida ku xusan qorshaha lagu heshiiyay.
- Inuu ka qaado tallaabooyin edbined oo ku habboon shaqaalaha si ula kac ah ama si dayacaad weyn ah uu waxyeeleeya ardayga • aaladaha shakhsiyeed.

Masuuliyadaha Macallinka

- Inuu ku dhaqmo qodobada qorshayaasha ardayga kaliya iyo qoyska ee la xiriira haysashada iyo isticmaalka aaladaha elektaroonia ah
- ee shakhsiyeed.
- Haddii habdhaqanka ardayga ama haysashada aan habboonayn ay u baahan tahay in inuu ka qaado aaladda, ha isticmaalo daryeel caadi ah oo
- taxaddar leh marka la eego aaladda uu hayo oo ha keeno xafiiska dugsiga sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah. • Ha u gudbiyo codsiyada waalidiinta ee ku saabsan haysashada iyo isticmaalka taleefanka gacanta maamulaha dugsiga.

Tixraaca Ogaysiiska Sanadlaha ah: Aaladaha Elektarooniga ah ee Shakhsiyeed ee Ardayga: Fershanka Dugsiga Hoose. Agoosto 2011/dib loo eegay Juunyo 2012, Maajo 2013 NMiller, DPD

FILASHOOYINKA DUGSIGA OO DHAN

Pratt wuxuu ku dadaalaa inuu dhibaatooyinka ku xalliyo hab nabad ah bilaa turxaan ah. Waxaanu ka filnaa ardayda inay isticmaalaan habab nabad ah si uga fogaadaan una xalliyaan dhibaatooyinka. Waxaanu filnaa in dhammaan ardayda Pratt ay raacaan filashooyinkan aasaasiga ah:

Marka la joogo garoonka ciyaarta:

- Faro-ka-ciyaarka lama oggola.
- Saddex siiri: joojiya ciyaarta oo saf gala.
- Khilaafka nabad ku dhammee.

Marka la joogo marinada dhismaha:

- U socda si badbaado leh marinada.
- Isticmaal cod deggan.
- Aqoonsi fasax hayso marka aadan la socon qof wayn.

Kahor/Kadib Dugsiga:

- Fasalka waa inaad joogto 8:05 gh.
- Basaska u raaca macallimiinta.
- La joog horjoogaha baskaaga.

Kulamada:

- Aamus haddii lagu dhaho aamus.
- Si fiican wax u dhagayso.
- Isticmaal "Habdhaqan Hore u Kaalay iyo Dhagaysi"

Suuliyada:

- Hadday isticmaalayaan wakhtiga xiisadaha lagu jiro, ardaydu waxa waajib ah inay sitaan aqoonsiga fasaxa.
- Si habboon u isticmaal.
- Nadiifi suuliga markaad ka dhammaysato.

Kafateeriyada:

- Hadalka hoos u dhig.
- Gacmahaaga, cagaha, cuntada, iyo alaabada ilaasho.
- Nidaamka safka raac.
- Toos u tag kursigaaga. Waa laguu cudurdaari.

FILASHOOYINKA HABDHAQAN

Ujeedada Pratt waxa in lagu xalliyo mashaakilka si nabad ah oo bilaa turxaan ah. Waxaanu dhisnaa awoodda ardaydu ku dabbigi karaan xirfadaha dhibaato-xallinta ee naqdinta ku dhisan. Marka khilaaf koboc ahaan habbooni yimaaddo, tusaale ayaanu ku bixinaa, waanu barnaa, oo ku xoojinaa xalal nabad ku dhisan, taasi oo ku qalabaynaysa ardaydeena farsamooyin kala duwan oo ay si nabad ah khilaafyada ugu xallin karaan. Waxaanu rumaysannahay xirfadahani inay anfici doonaan guriga, dugsiga, iyo bulshada markay waynaadaan; sidaas darteed, halkan Pratt, waxaanu ka filnaa ardayda inay yeeshaan habab nabad ku dhisan oo ay dhibaatooyinka ku xalliyaan

Nadiifnimada Dhismaha

Pratt waa DUGSIGAAGA. Fadlan caawi hubinta inuu nadiif ahaado oo nidaamsanaado. Sidan waxaad ku samayn kartaa inaad ilaaliso nadaafadda khaanaddaada, inaad miiskaaga iyo meesha aad ku shaqayso nidaamiso iyo inaad qashinka ku riddo weelka qashinka. Haddaad ku aragto wax feegaar ama waxyeelo ah dhismaha, fadlan u sheeg qof wayn. Hubi inaad **KAGA TIMAAD XANJADA IYO INIINYAHA GABBALDYAHA** guriga.

Nooca Labbiska

Ardayda oo dhan waa inay dugsiga yimaaddaan iyagoo si fiican u labbisan. Dharka waxbarashada dadka ka jeedinaya waa **inaan** dugsiga loo soo xiran. Ardayda waa inaysan u soo qaadan dugsiga kabaha taayirrada leh ama baranbooriyada haddaysan ka qayb ahayn hawsha ama safarka aqoonkororsi ee fasalka. "Heelies" (Kabaha cirbaha taayirka ku leh) dugsiga lagama oggola.

Wiishka

Wiishka waxa kaliya la isticmaali karaa marka si gaar ah loo hore loogu sii sheego. Fadlan la xiriir kalkaalisada dugsiga ama kaaliyaha caafimaadka haddii ilmahaagu u baahan yahay inuu isticmaalo wiishka.

Socdaalada Aqoonkorosiga

Socdaalada aqoonkororsigu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah waayoaragnimada barashada ee ilmaha. Waa lagugu wargelin markasta oo ilmahaagu u baxayo socdaal aqoonkororsi. Islibka idanka ayaa guriga loo soo diri kahor inta socdaalku uusan bilaabmin.

Ilmahaaga loo oggolaan maayo inuu ka qaybqaato socdaalka aqoonkororsiga adigoo u idmin.

Shayada Sharci Darrada/Halista Ah

Ardaydu waa inaysan keenin dugsiga shayo sharciga ka soo horjeeda inay carruurto qaataan sida khamrada iyo sigaarka. Ardaydu waa inayna keenin dugsiga shayada sharciga ka soo horjeeda inay da' kasta qaadato, sida daroogada sharci darrada ah, mukhaadaraadka, ama waxyaalaha maanka dooriya. Ha keenin shayada ay ku jiraan waxyaalaha lagu neefsado ee halista ah, bilikeeyada, ama taraqyada. Hubka iyo waxyaalaha hubka shabbaha dugsiga ama baska midna lagama oggola.

Baadi-Xafidka

Miiska baadi-xafidka wuxuu yaalaa halka dugsiga laga soo galo. Ardayda iyo waalidiinta waxa lagu dhiirigaliyaa inay halkaas badanka ka eegaan wixii ka luma. Fadlan ku calaamadee shayada oo dhan -gacm-gashiyada, weelka qadada, iwm., magaca ilmahaaga!

Qolka qadada/Kafateeriyada

Quraacda iyo Qadadu waa wakhtiyo muhiim ah oo maalinta ka mid ah. Halkan Pratt, waxaanu filnaa in ardayda oo dhan ay u isticmaali doonaan wakhtigooda inay cunaan cunto miisaaman oo ay dhexgalaan oo bartaan lodkooda. Kafateeriyada waxa kormeera shaqaalaha Pratt. Waxa la filayaa in dhammaan ardaydu ay ku dhaqmaan tilmaamaha shaqaalaha si loo hubiyo deegaan badbaado leh. Ardaydu waxay heli doonaan khudaar isku-dar ah oo uu qofku diyaarsado iyo cuntooyin kale oo kala duwan. Waxaanu ku dhiirigalinayaa ardayda oo dhan inay qaataan xaddiyo caafimaad leh markay sida madaxa bannaan u dooranayaan cuntadooda. Fadlan kala hadal ilmahaaga ahmiyadda ku dhaqanka nidaamka u yaala kafateeriyada.

BACAHA JIBISTA IYO SHARAABYADA SONKORTA LEH LAMA OGGOLA. Fadlan ha soo siin kuwan ardaydaada. Qado dugsi oo caafimaad leh ayaa cid kasta la siiyaa. Haddii ilmahaagu qado kala yimaad guriga, fadlan hubi inay caafimaadka u fiican tahay. Cuwaafo caafimaad leh ayaa la siiyaa ardayda, fadlan guriga ha uga soo dhiibin cuwaaf.

BARNAAMIJKA QURACDA IYO QADADA

Quraacda iyo Qadada dugsigu waa u bilaa lacag ardayda oo dhan. Waxaanu kugu dhiirgalinaynaa ilmahaagu inay fursaddan ka qaybqaato. Ku bilaabidda maalinta quraac caafimaad leh waxay xoojisaa barashada! Ardayda fasalka Hi5 - 5aad waxay quraacda ku cunaan fasalka, qadadana waxay ku cunaan qolka qadada iyadoo shaqaalaha dugsigu ilaalinayaan.

Dhammaan qoysaska carruurtoodu dhigato degmada waa inay buuxiyaan Codsiga Faa'idooyinka Waxbarasho sanad kasta. [Waxa dhici karta inaad ka buuxiso codsi SchoolCafe](#). Samaysato yuusarneem iyo baasweer aad ku gasho. Guji Eligibility Benefits, kadib guji Apply. Waraaqda ogaysiiska mutaysiga ayaa ku soo gaari doonta 10 maalmaha la shaqeeyo ah gudahood. Buuxinta codsiga waa daruuri sababtoo ah wuxuu go'aamiyaa heerkaayaga Maalgalinta Gobolka iyo Fadaraalka.

MPS waxay ku samaysay hagaajino aan yarayn noocyadeeda cuntada iyo waxyaalaha ay bixiso sanadadii dhawaa, iyadoo diiradda saaraysa cuntooyinka isku-dhan, darayga ah ee gudaha laga soosaaro. Haddaad wax su'aalo ah ka qabto barnaamijka quraacda ama qadada, fadlan soo wac isu-duwaheena adeegga cuntada 612-668-1111.

CAWAAFTA iyo MACMACAANKA

Cuwaaf: Halkan Pratt waxaanu siinaa ardayda oo dhan cuwaaf caafimaad leh. Cuwaaf waa miro ama waa khudaar. Fadlan ha u soo dirin cuwaaf kale ilmahaaga. Haddaad ka qabto su'aalo ama walaacyo tan, la xiriir macallinka ilmahaaga.

Macmacaanka: Siyaasadda demgadu waxay diiday keenista cuntada macmacaanka ah xilli kasta. Keegagga dhalashooyinka, keegga koobka iwm. lama oggola. Haddaad rabto inaad u dabbaaldegeto dhalashada ilmahaaga, fadlan u soo dhiib ilmahaaga istikarro, qalin-qoriyo, iwm. maalintaas. Kuwan waxa la siin doonaa ardayda fasalkiisa rawaxaadda kahor. Fadlan keen wax ku filan ardayda oo dhan.

BARNAAMIJKA MIRAHA IYO KHUDAARTA DARAYGA AH

Barnaamijka Miraha iyo Khudaarta Darayga ah waa barnaamij deeqda fadaraalka ah kaasi oo siiya cuwaaf ah miro ama khudaar daray ah dhammaan ardayda Pratt. Waa hab wacan oo ardayda lagu xiise-gelinayo cunista cunto caafimaad leh iyo isku-dayga miro iyo khudaar ku cusub. Tusaalayaasha qaar waa shammaam, Cananis, Cinabka Cas, Nectarines, Jicama, Qajaar, Barbarrooni iyo Borokooli.

DHAMMAAN SIYAASADAHA DEGMADA WAXA LAGA HELI KARA [HALKAN](#) FADLAN KA TIXRAAC SU'AALAHA GAARKA AH EE AAD QABI KARTO.

FILASHOYINKA KA QAYBGALKA

Lacagta iyo Dugsiga

Ardayda looma sheego inay lacag dugsiga u soo qaataan haddaysan daruuri ahayn. Tusaalayaasha wakhtiyada ay habboon tahay in dugsiga lacag loo soo qaato waxa ka mid noqon kara:

- Lacagta Qadada/Caanaha
- Sawirrada Ardayda
- Mashaariicda Ururka Waalidka Macallinka (PTO)
- Socdaalada Aqoonkororsiga Gaarka ah
- Dalabyada Buugaagta Scholastic

Markay daruuri tahay inaad lacag dugsiga u soo dirto, fadlan ku rid lacagta gal-waraaqeed xiran oo ay dusha kaga qoran yihiin magaca ilmaha, lambarka qolka, xaddiga lacagta, iyo ujeedada. Mar kasta oo dugsigu ilmahaaga u sheego inuu lacag soo qaado, qoraal sheegaya sababta ayaa guriga loo soo diri.

Guriga Uga Kaalay!

Waxyaalaha soo socda dugsiga looguma talogalin sababtoo ah waxa dhici karta inay lumaan ama la xado oo ay arbushaan waxbarista iyo barashada.

- ◇ Qalabka carruurto ku ciyaarto
- ◇ Dhammaan Ciyaaraha Elektarooniga ah
- ◇ RABBAAYADAHA
- ◇ Qalabka Sii Daaya Fallaaraha
- ◇ Tareedhin Kaaris
- ◇ Lacagta (haddii aan loogu baahnayn dhacdooyin gaar ah)
- ◇ Xanjada, nacnaca, iniinyaha gabbal-dayaha
- ◇ Waxyaalaha qaaliga ah
- ◇ JIBISTA iyo SHARAABYADA SONKORTA LEH

Haddii shayadan dugsiga la keeno iyadoon la haysan idanka Macallinka/Maamulaha, waxa qaadi doona macallinka fasalka waxaana la soo celin rawaxaadda. Dhacdooyinka soo noqnodaa waxay keeni doonaan in shayga la sii hayo ilaa waalidka/masuulka uu yimaaddo si uu u qaado. Qalabka ciyaaraha, sida kubbadda cagta, kubadda xoog-xoogga, ama xayawaanka, waxa sidoo kale waajib ah in oggolaansho laga haysto macallinka iyo maamulaha intaan dugsiga la keenin.

Filashooyinka Nasashada

Ardaydu waxay leeyihiin wakhti nasasho inta dugsiga la joogo. Markay cimiladu aad u qabowdahay, waxa dhici karta in nasashadu ka dhacdo gudaha, laakiin arrintani waxay ku gaar tahay xaaladaha qabowga daran. Dhammaan ardaydu bannaanka ayey u bixi si ay u hesho hawo daray ah iyo jimicsi. Maalmaha qabowga ah iyo bilaha jiilaalka, waxa muhiim noqon doonta inaad funaanad ama koor ku habboon jiilaalka aad u soo siiso ilmahaaga si uu ugu raaxaysan karo nasashada bannaanka si uu u dhexgalo lodkiisa.

Fadlan u soo dir qoraalka dhakhtarka dugsiga haddii ilmahaagu leeyahay xaalad caafimaad oo gaar ah oo laga xannibay hawlaha xilliga nasashada la qabto. Waxaanu codsanaynaa adiga iyo ilmahaagu inaad isla eegtaan filashooyinka garoonka ciyaarta.

- U isticmaal qalabka garoonka ciyaarta si sax ah—sibixada waa in caguhu kaa horreeyaan, leexada sida loogu talagalay u isticmaashaa
- Garoonka ciyaarta lama kala xigo—wax kasta kolba cid ha loo daayo
- Waa caadi inaad inta aad doonto cararto si aad tamarta dheeraadka ah iskaga saarto,
- Ciyaar 4-Square, xantaysi, shabadaan, iyo ciyaaro kale oo aad taqaan.
- **CODKA SARE U QAAD!! Tani waa fursadda aad codka sare ugu qaadi lahayd (xasuunaw inaad erayo fiican ku dhawaaqdid).**

Suuliga/Xamaamka

Qaar badan oo ardaydeena ka mid ah waxay geli karaan xamaam ku yaala fasalkooda. Markay dhacdo in suuliyada caamka ah la isticmaalayo, waxa la filayaa in ardaydu noqdaan qaar xushmad muujiya, oo ilaaliya xuduudaha/asturnaanta. Waxa laga filayaa DHAMMAAN ardaydu inay dhaqaan gacmahooqa markay isticmaalaan suuliga oo ay qashinkoodana ku ridaan weelka qashinka. Markaynu sidan samayno, waxaynu gacan ka gaysanaynaa joogtaynta dhisme nadiif ah oo caafimaad leh. Aqoonsi fasax ayey waajib tahay in la haysto marka fasalka laga baxayo.

U Kala Gudbidda Dhismaha

Barashadu waxay had iyo jeer ka qabsoontaa aagagga dhismaha oo dhan maalinta oo idil. Waxa muhiim ah inaad xasuusnaato in qaylada marinada dhismaha ay gudubto oo ay arbushi karto ardayda. Fadlan codka hoos u dhig oo hubi inaad haysato aqoonsi fasax mar kasta.

SIYAASADDA BASKA / KEENISTA / QAADISTA WAALIDKA

Dugsiyada Dadwaynaha Minneapolis waxay siiyaan gaadiid bas ah ardayda Barbaarinta ilaa fasalka shanaad iyo ardayda Waxbarashada Gaarka ah kaasi oo geeya kana qaada dugsiga hadday deggan yihiin meel rubuc mayl ama ka badan u jirta dugsiga ama hadday tahay inay ka gudbaan jid aad u mashquul badan. Carruurtu waa inay joogaan halka basku ka qaadayo ugu yaraan shan daqiiqo ka hor waqtiga qaadista ee qorshaysan. Marka ay jiraan xaalado cimilo oo xun, basasku waxay socon karaan goor dambe.

Raacista bas kale ama lugayn

Ardaydu waa inay raacaan baska loo qondeeyay oo keliya haddii aan la helin warqad waalid/wicitaan oo codsanaya in ardayga loo oggolaado inuu raaco bas kale ama uu guriga u lugeeyo. Aqoonsi fasaxa baska ah oo gaar ah ayey waajib tahay in la diyaariyo oo la siiyo ardayga kahor rawaxaadda. Haddii arday uu baska u raacayo guriga qoys kale oo reer Pratt ah, waxa waajib nagu ah inaan qoraal ka hayno labada waalidba. Darawalada waxa la farayaa inaysan aqbalin magacyada aan ku jirin liiska dhabbaha baska.

Keenista Waalidka

Haddaad keento ilmahaaga dugsiga, isticmaal Orlin Ave SE. Waxa lagu tilmaami doonaa inaad gaariga gayso baarkinka. Ardayda waxay uga bixi gaadiidkaaga waddooyinka lugta shaqaalaha ayaana ku hagi doona dugsiga. Fadlan ha ku dejin ardayda dugsiga hortiisa si aad u yarayso ciriiriga. Ardayda oo dhan waxay ka gali doonaan ALAABKA 1.

Qaadista Waalidka

Haddaad ilmahaaga dugsiga ka qaaddo, fadlan ku soco baarkinka oo safka ku sug si aad u qaaddo ardaygaaga. Ardaydu waxay ku sugnaan gudaha oo shaqaalaha ayaa shaqaalaha u sheegi doona inuu ardayda gaadiidkaaga soo galiyo. Waxa la bilaabi in ardayda la sii daayo 2:35 gd. Ardayda oo dhan waxay ka bixi doonaan ALAABKA 2.

Kuwa lugeeya

Ardayda haysta idan qoran oo waalid waxa loo oggol yahay inay guriga ilaa dugsiga lugeeyaan. Kuwa lugeeya dhammaantood waxay ka baxaan albaabada hore, ALBAABKA 1. Shaqaalaha iyo kuwa dadka jidka ka gudbiya ayaa ka caawiya inay jidka ka gudbaan oo ay ka baxaan dhulka dugsiga.

Waalidka La Raacaya

Waalidiinta raba inay baska u raacaan dugsiga kana soo raacaan iyagoo ilmahoodu weheliyo waxa waajib ah inay hore u sii sheegaan iyagoo la soo xiriiraya Maamulaha Badbaadada Dugsiga ee gaadiidka, 612-668-2300.

Marnaba looma oggola waalidiinta inay raacaan bas oo la hadlaan arday aan ahayn kuwooda.

XEERARKA BADBAADADA BASKA DUGSIGA

- Ka fogow "Meelaha Khatarta ah" bannaanka baska.
- Raac tilmaamaha darawalka.
- Wakhtiga ilaali.
- Had iyo jeer FARIISO.
- Muuji ixtiraam, ha dagaalamin, cid ha u dhaaran ama cid ha ku qaylin.
- Lama oggola IN WAX LAGU CUNO ama LAGU CABBO baska.
- Ilaali nadaafadda baskaaga. Baska waxyeelo ha u gaysan.
- Ku ilaali madaxa iyo gacmahaaga gudaha oo daaqadaha baska ha kala dhicin.
- Lama oggola walxo ama rabbaayado khatar ah.
- Waa inaan daaqadaha la furin wax ka badan kala-bar.

SIYAASADDA BASKA - DEGMADA

Dugsiyada Dadwaynaha Minneapolis waxay u kala sooceen habdhaqanada gaarka ah ee laga yaabo inay ka dhacaan baska laba HEER. Waxaanu liis garaynay habdhaqanada HEER kasta iyo sidoo kale cawaaqibta ka dhalan kara si markaa aad u fahmi karto oo aad si furan ugala hadli karto ilmahaaga.

Halkan Pratt, waxa waajib ah inaanu hubino in ardayda oo dhan ay si badbaado leh gaadiidka ugu tagaan dugsiga ugana yimaadaan. Waalidiinta, waxaad nooga caawin kartaa gaarista tan inaad kala hadashaan ilmahiina habdhaqanka badbaadada leh marka baska la saaran yahay, iyo sida codkoodu u noqon karo kan joojiyo habdhaqanada kale ee taban ee ay arki karaan. Waxaanu rajaynaynaa ardayda waawayni inay tusaale fiican u noqdaan ardayda kale ee baska saaran.

Waalidiinta, fadlan carruurtiina la eega xeerarka badbaadada. Haddaad qabto su'aalo ku saabsan Siyaasadda Baska Dugsiyada Dadwaynaha Minneapolis, fadlan nala soo xiriir.

TILMAAMAHA IYO CAWAAQIBKA HABDHAQANKA

Dambiga Heerka 1	Dambiga Heerka 2
Candhuufayn	Qaar kala soo bixidda daaqadda
Qaylo xad dhaaf ah	Tuuridda / shiishidda walax
Faro-ka-ciyaar xad dhaaf ah	Daandaansi ama u xoog-sheegad qof kale
Wax ku cunid / ku cabbid / qashin ku daadinta baska	Aflagaado / hanjabaad ku aaddan darawalka / kaaliyaha baska
Ka tagista kursiga / istaagidda iyadoon idan laga haysan darawalka	Haysashada / isticmaalka sigaar ama mukhaadaraad
Isticmaalidda weel dareeraha qaab kasta ha ahaadee	Burburinta baska (qofka waa laga magdhabi doonaa)
Aflagaadada, hadalka cayda ah, dhibaataaynta, afgaradka dambiga ah ama haysashada agab aan la aqbali karin	Qabsashada ama isku-dayidda qabsashada qaybta dibadda ee baska socda

Caasiyidda darawalka / kaaliyaha	Daaridda taraq, bilikey ama walax kale oo olosha
Raacidda bas uusan lahayn ama isticmaalidda meel basku joogsado oo uusan lahayn	Ka galitaanka ama ka bixidda albaabka xaaladda gurmada ee baska taasoo aan la oggolaan / farafaraynta qalabka baska
Furidda daaqadda in ka badan khadka badbaadada	Haysashada ama ku hanjabidda hub, waxyaalaha qarxa ama waxyaalaha ololi og
Dambiyada kale ee uu soo sheego darawalka ama maamulaha	Haysashada ama isticmaalka qalimaanta leysarka / fallaaraha
	Dambiyada kale ee uu soo sheego darawalka ama maamulaha
	Masabidka darawalada iyo / ama ardayda

Heerka	Dambiga 1	Dambiga 2	Dambiga 3	Dambiga 4
Heerka 1	Shir Kooxda Dugsigu la yeelato Ardayga iyo Digniin 1-5 maalmood oo Baska laga Hakiyo	Shir Kooxda Dugsigu yeelato iyadoo Qoyska la Wargelinayo iyo Qorshe Bas oo la dejiyo si wax Miro-dhal ah uga soo baxaan 1-5 maalmood oo Baska laga Hakiyo	5-10 maalmood Ka Hakinta Baska Shir Kooxda Dugsigu yeelato iyadoo Qoyska la Wargelinayo iyo Qorshaha Baska oo dib loo eego si wax Miro-dhal ah uga soo baxaan	Kulanka Waalidka, Maamulaha iyo Kooxda Dugsiga Ka Hakinta ugu yar ee Baska oo 10 maalmood ah Suurtogalnimada Luminta Mudnaanta Baska
Heerka	Dambiga 1	Dambiga 2	Dambiga 3	Dambiga 4
Heerka 2	Kulanka Waalidka, Maamulaha iyo Kooxda Dugsiga Qorshaha Baska ee loo dejiyo si Miro-dhal loo gaaro Ka Hakinta Baska oo 5 maalmood ah	Kulanka Waalidka, Maamulaha iyo Kooxda Dugsiga Qorshaha Baska dib loo eegay si Miro-dhal loo gaaro 5-10 maalmood Ka Hakinta Baska	Kulanka Waalidka, Maamulaha iyo Kooxda Dugsiga Qorshaha Baska dib loo eegay si Miro-dhal loo gaaro Ka Hakinta ugu yar ee Baska oo 10 maalmood ah	Kulanka Waalidka, Maamulaha iyo Kooxda Dugsiga Luminta Mudnaanta Baska

Waxaanu idiinka mahad celinaynaa taageeradiina joogtada ah ee hubinta in dhammaan ardaydeenu ay helaan gaadiid dugsiga u geeya uguna soo qaada si badbaado leh.

WADA-XIRIIRKA

Qoraalada gaaban

Shaqaalaha dugsigu waxay kula xiriiri doonaan waalidiinta taleefan, qoraalo gaaban iyo iimeylo. Fadlan waydii ilmahaaga maalin kasta hadday jiraan farriimo dugsiga ka socdaa.

Fooldarrada Toddobaadlaha ah

Waxyaalaha ku jiri kara fooldarka waa shaqada ardayga, qoraalada gaaban ee macallinka, shaqada guriga, islibyada idanka, warbixinaha horumarka, warsidayaasha dugsiga/fasalka ama xog-sidayaal kale. Fadlan maalin kasta hubi boorsada ilmahaaga!

Warsidayaasha

Farriimo toddobaadle ah oo ka yimaadda macallinka ilmahaagu waa wax laga raadin karo. Kuwani waxay noqon karaan warsidayaal, warbixinaha horumarka, iyo wargelino. Kuwan guriga ayaa loo soo diraa iyagoo ku jira fooldarro. Warside bille ah ayaa iimeyl lagu soo diri doonaa. Fadlan hubi in xafiisku hayo iimeylkaaga saxda ah.

Farriinsidaha Dugsiga

Warsidayaal bille ah oo ka socda Pratt oo wada macluumaad ku saabsan kulamada PTO-ga, dhacdooyin dugsi oo muhiim ah, iyo fursado loogu talagalay fursadaha isdirenimada daryeelaha ayaa lagu wadaagi doonaa iimeyl.

Shirarka

Laba jeer sanadkii, waxaad fursad u heli doontaa inaad la kulanto macallinka ilmahaaga muddada shirarka waalidka/macallinka. Fadlan ka hubi kaaladarka taariikhahan. Waxa lagugu dhiirigelinayaa inaad codsato shir wakhti kasta oo aad dareemayso inaad u baahan tahay. Waxaad u diri kartaa iimeyl, cod ayaad u dhaafi kartaa ama qoraal gaaban ayaad u diri kartaa macallinka ilmahaaga si aad u muddayso wakhtigan dheeraadka ah. Macallinku wuxuu ku beegi doonaa shirka wakhti labadiinaba idiin habboon.

Kaararka Warbixinta: Kaararka warbixinta waxa la buuxin doonaa oo guriga loo diri afar jeer sanad dugsiyeedkan. Haddaad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan kaarka warbixinta ilmahaaga, fadlan la xiriir macallinka ilmahaaga.

Wicitaanada Taleefanka

Carruurta iyo macallinka midkoodna fasalka dibaddiisa loogama yeeri karo si uu taleefan ugu hadlo marka casharrada la dhiganayo. Xaaladda gurmada ah ama haddii aad u baahan tahay inaad la hadasho ilmahaaga inta uu dugsiga joogo, xafiiska ayaa kaa caawin doona inaad hesho ilmahaaga ama gaarsiinta farriin. Haddaad qabto su'aal ku saabsan ilmahaaga, macallinka/xubinta shaqaalaha ah ayaa dib kuu soo wici doonta sida ugu dhakhsaha badan. Ardaydu waxa dhici karta inay samayn karaan wicitaano xaaladda gurmada ah/daruuri ah iyagoo idan ka haysta macallinka ama adeegaha bulshada waxaana lagu dhiirigelinayaa inay soo koobaan tirada wicitaanada iyo muddadaba.

Wicitaanada/limeylada Robo

Wicitaanada/limeylada Robo waxa loo isticmaali doonaa in lagu wadaago macluumaadka sidoo kale.

Websaytka

Pratt waxay leeyihiin websayt u ah khayraad fiican ilmahaaga iyo qoyska. Waxaad ka helaysaa inaad si dhaw u fiiriso dugsigeena, iyo dhammaan waxyaalaha la xiriira. <https://Pratt.mpschools.org>

XIRITAANKA XAALADDA GURMADKA AH

Dugsigu waa shaqayn doonaa maalin kasta haddaysan jirin xaalado cimilo oo daran (qabow ama baraf). Hadday dhacdo in dugsiga la xirayo, wargelino ayaa laga sii dayn doonaa kahor 7:00 gh. raadiyowga ama telefishanada deegaanka iyo websaytka degmada. Waxaad hubin kartaa websaytka, www.mpls.k12.mn.us ama ka dhagaysan kartaa Dugsiyada Dadwaynaha Minneapolis mid kamid ah kuwa soo socda:

- WCCO AM 830
- KBEM FM 88.5
- WCCO TV CHANNEL 4
- KSTP TV CHANNEL 5
- KMSP TV CHANNEL 9
- KARE TV CHANNEL 11

Ha soo wicin dugsiga. Hubi raadiyowga ama TV-ga oo haddaysan jirin wax wargelin ah, dugsigu waa shaqayn doonaa. Hadday cimiladu daran tahay, laakiin la socon karo, waxaanu kuu sheegaynaa inaad adigu go'aanka leedahay marka la eego u soo dirista ilmahaaga ee dugsiga. Da'da ilmaha iyo xaaladaha caafimaad ee gaarka ah waa in la tixgeliyo. Basasku waa soo daahi karaan cimilada xun, fadlan hubi in ilmahaagu dharka qabowga xiran yahay oo u sheeg ilmahaaga inuu gudaha soo galo haddii daahistu aad u dheer tahay.

CARBISYADA XAALADDA GURMADKA

Dugsiga Hoose ee Pratt waxa uga baahan Waaxda Minnesota ee Waxbarashada inay muddeeyaan carbisyada badbaadada oo joogto ah sanadka oo dhan. Saddexdda carbis ee aanu dabbaqno waa dabka, duufaanta tornaado iyo joogista guryaha.

CARBISKA DABKA

Si loo hubiyo badbaadada ardaydeena, Waaxda Minnesota ee Waxbarashadu waxay u baahan tahay shan carbiska dabka ah sanad dugsiyeedka oo dhan. Marka qaydhaantu dhawaaqdo, ardayda iyo shaqaaluhu waxay dhismaha uga bixi deggan oo nidaamsan. Macallimiintu waxay qaadan Boorsooyinkooda Xaaladda Gurmada ah.

CARBISYADA DUUFAANTA TORNAADADA

Hal carbiska tornaadada ah ayaa la qabtaa guga si la isugu dubbarido Maalinta Carbiska Tornaadada Gobolka oo Dhan. Ardayda waxa la geeyaa aagag badbaado oo loogu talagalay (ka fog daaqadaha iyo burburka soo hoobanaya).

CARBSIYADA JOOGISTA GURYAHA

Carbiska joogista guryaha waa laba qaybood: **Code Yellow and Code Red**. **Code Yellow** waxa la wacaa marka ay jirto khatar ama khatar ka imanaysa dibadda dhismaha - dhammaan albaabada gudaha waa la qufulaa waxaana sii socda waxbarashada fasalka. **Code Red** waxa la wacaa marka ay jirto khatar gudaha dhismaha - albaabada gudaha iyo dibaddu qufulan yihiin, aan dhismaha la galin karin oo cidna aan loo oggolayn inay dhismaha gasho ama ka baxdo. Carruurta waxa la geeyaa meel fasalka ah oo aan laga arki karin. Yoolku waa joogtaynta deegaan badbaado leh oo ardayda iyo shaqaalaha oo dhan ay helaan.

CARBISYADA DAADGURAYNTA

Markay dhacdo in ardaydu ay tahay inay ka baxaan dugsiga, Pratt. Ardayda waxa la gayn doonaa Prospect Park United Methodist Church located oo ku yaala 22 Orlin Ave SE. Aqoonsi ayaa LOO BAAHAN doonaa si loo qaado ilmahaaga.

DARYEELKA CAAFIMAADKA

Xafiiska Caafimaadka

Kaaliye Adeegga Caafimaadka ayaa ka hawlgala xafiiska caafimaadka maalin kasta markay ardaydu joogaan. Waxay u tabobaran yihiin gargaarka degdegga ah, bixinta daawada iyo sida loo daryeelo ardayda jirran. Kalkaaliso Dugsi oo Shati Haysato (RN) ayaa la heli karaa dhawr maalmood toddobaadkii si ay u kaalmayso gudbinaha iyo wixii xaalad caafimaad ah ee saamayn ku yeelan karta barashada.

Fadlan ogaysii Xafiiska Caafimaadka haddii ilmahaagu qabo xaalad caafimaad oo saamayn karta barashada iyo/ama keeni karta xaalad gurmada ah, sida neef/xiiq, sonkorow, ADHD, xasaasiyado, suuxdin/qallal, taariikh hore oo ah caabuqyada dhagaha, dhibaatooyinka kaadi-haysta, iwm. Dayr kasta, waalidiinta waxa la waydiistaa inay buuxiyaan foomka "**macluumaadka Caafimaadka Sanadkii**" kaasi oo siiya shaqaalaha dugsiga macluumaad caafimaad oo cusub.

Lambarka Taleefanka Xafiiska Caafimaadka: 612-668-1124

Daawooyinka:

Siday dhigayso siyaasadda Dugsiyada Dadwaynaha Minneapolis, **daawada waxa kaliya dugsiga lagu siin karaa markuu jiro oggolaansho qoran oo ka socda bixiyaha daryeelka caafimaadka iyo waalidka/masuulka.** Oggolaanshaha daawada oo cusub ayaa loo baahan yahay in la bixiyo sanad dugsiyeed kasta. **Daawada waxa waajib in dugsiga loo diro iyadoo ku jirta galkeeda/weelkeeda asalkaah** (ama lagu iibsaday markuuna dhakhtar qorin) **oo muujinaya magaca ardayga iyo tilmaamaha saxda ah ee qaadashada daawada.** Si arbushku uga yaraado wakhtiga ardayga uu fasalka ku jiro, qoysaska waxa lagu dhiirigelinayaa inay qaadashada daawada ku beegaan saacadaha kuwa dugsiga aan ahayn markasta oo ay suurto gal tahay. Daawooyinka muddada gaaban soconayo sida antibayootiga waxa sida badan la qaadan karaa kahor iyo kadib dugsiga. Foomka oggolaanshaha daawada waxa laga heli karaa xafiiska caafimaadka.

Daawooyinka Neefta:

Ardayda neefta qabta waxa lagu dhiirigelinayaa inay ku haystaan daawada neefta baabiisa dugsiga si ay u adeegsan karaan haddii neeftu ku kacdo iyo/ama haddii daawada neefta loo baahdo jimicsiga kahor. (Siyaasadda daawada ee sare ku xusan sidoo kale waxay khusaysaa daawada neefta.) Waxa yaala qalabka xiiqda (nebulizer) xafiiska caafimaadka. Ardayda u baahan daawada neefta waxay u baahan yihiin inay keenaan daawada neefta iyo tuunbooyinka qalabka xiiqda. **Haddii bixiyahaaga daryeelka caafimaadku ku siiyo "Qorshe Hawleedka Neefta", fadlan u dir nuqul kan ah dugsiga.** Qorshe Hawleedyada Neefta ee muddadoodu ka yar tahay sanad oo ay saxeexeen bixiyaha daryeelka caafimaadka iyo waalidka waxa loo tixgaliyaa oggolaansho qoran marka la eego ku bixinta daawada neefta dugsiga. Haddaad jeceshahay in ilmahaagu isagu sito daawada neefta, fadlan la xiriir kalkaalisada dugsiga 612-668-1124 si aad ugala hadasho nidaamyada uu qofku sidan karayo.

Tallaalka:

Shuruucda Minnesota waxay rabaan caddaynta tallaalka dhammaan carruurta dugsiga. Waalidiinta waxa loo sheegayaa inay bixiyaan diiwaanada tallaalka marka dugsigu diiwaangalinayo. Haddaad su'aalo ka qabto shuruudaha tallaalka, la xiriir bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ama shaqaalaha xafiiska caafimaadka dugsiga.

Kaararka Xaaladda Gurmada

Kaararka Xaaladda Gurmada aad ayey muhiim u yihiin!

Markay jirto xaalad gurmada ah ama jirro, waalidka ama masuulka waxa lagala soo xiriiri kaararkan. Aad ayey muhiim u tahay inaanu hayno kaarka xaaladda gurmada ee ugu dambeeyey ee ilmahaaga oo muujinaya lambarka taleefankaaga guriga, lambarka shaqada, magacyada iyo lambarrada saddex qof oo kale oo waawayn oo aanu wici karno iyo magaca iyo lambarka dhakhtarkaaga. Hubi inaad buuxiso kaararka kuna soo celiso dugsiga isla markiiba. Waxa aad u muhiim ah in la ogaysiiyo xafiiska caafimaad wakhti kasta sanadka oo dhan haddii macluumaadka kaarka wax iska beddelaan.

Ku Lug Lahaanshaha Waalidka

Dugsiga Hoose ee Pratt waxaan rabnaa dhammaan waalidiinta iyo xubnaha qoysku inay dareemaan inay ku lug leeyihiin waxbarashada carruurtooda. Ku lug lahaanshaha waxay ka dhigaa kartaa la hadalka, u diridda qoraal gaaban ama iimeylo macallinka, ku shaqaynta isdirenimo, ka caawinta shaqada guriga amase waydiinta ilmahaaga wixii maanta uu dugsiga ka sameeyey.

◆ **Ururka Waalidka Macallinka (PTO)**

Pratt waxay leeyihiin Ururka Waalidka Macallinka oo shaqeyta. Kulamo ayaa si joogto ah loo qabtaa sanad dugsiiyeedka oo dhan Salaasada labaad ama saddexaad ee bisha 6:00 gd. Waxa jira fursado badan oo aad isdirenimo ku shaqayn karto oo aad si firfircoon uga qaybqaadan karto dhacdooyinka dugsiga. Waayoragnimada ilmahaaga ee dugsiga waxa xoojin kara ka qaybqaadashadaada

◆ **Kooxda Goobta**

Pratt waa dugsii isagu inta badan go'aan-qaadashadiisa leh. Koox maamul ayaa si joogto ah u kulma si ay wax uga qabtaan arrimo fara badan oo la xiriira dugsiga. Wuxuu ka kooban yahay shaqaale, waalidiin iyo xubno bulsho. Dhammaan kulamadu waa furan yihiin. Waalidiinta waxa sidoo kale lagu martiqaadaa inay ku soo biiraan shaqaalaha si ay aragtidooda uga dhiibtaan go'aanada dugsiga.

◆ **Booqdayaasha**

Waxaanu ku dhiirgelinee kuno soo dhawaynaa waalidiinta/masuulada inay fasalada soo booqdaan sanad dugsiiyeedka oo dhan. Qoraal gaaban ama wicitaan taleefan oo aad u dirto macallinka ilmahaaga xilli hore ayaa had iyo jeer fiican. Haddaad wacdo macallinka ilmahaaga, wuxuu awoodi doonaa inuu kuu sheego wakhtiyada gaar ah oo la iska ilaaliyo, sida wakhtiga imtixaanku socdo, wakhtiyada socdaalka aqoonkororsiga iyo barnaamijyada gaarka ah. Fadlan ka doono xafiiska guud kaarka booqda. **Ardayda dugsiyada kale, walaalaha, ilmaadeerada/ilmaabtiyada/habarwadaagga, saaxiibada, iwm., lama oggola inay booqdaan ama xaadiraan fasalada Pratt xilliga dugsiga la dhiganayo. Kormeer laguma samayn karo ardayda aan ka qornayn dugsigeena.**

DHAMMAAN BOOQDAYAASHA DUGSIGA WAXA LAGA FILAYAA INAY SOO MARAAN XAFIISKA GUUD OO KA SOO QAATAAN KAARKA BOOQDAHA.

◆ **Ku shaqaynta isdirenimo**

Qaar badan oo macallimiinteena ka mid ah waxay ammaan u hayaan inay arkaan waalidiinta iyo isdireyaal kale oo ka caawinaya fasalka, socdaalada aqoonkororsiga iyo mashaariicda gaarka ah. Sidoo kale, xarunta warbaahinta, xafiiska iyo aagagga kale ee dugsiga waxay ku tiirsan yihiin taageerada isdirenimo ee qoysaska iyo bulshada. Dhammaan isdireyaasha xiriirka la leh ardayda waxa waajib ah in laga hayo Codsiga Isdirenimada Dugsiyada Dadwaynaha Minneapolis sanad dugsiiyeed kasta oo cusub. Iyadoo ku xiran nooca shaqada ay qabanayaan, isdireyaasha qaar waxay u baahan yihiin in sooyaalkooda la hubiyo. Tallaabooyinkani waa siyaasado toos ah si loo ilaaliyo ardayda iyo isdireyaasha labadaba. PTA sidoo kale waxay leedahay fursado badan oo waalidiintu uga caawin karaan qaaraan-ururinta iyo dhacdooyinka gaarka ah.

Badbaadada / Ammaanka

Dugsiga Hoose ee Pratt waa dhismaha "qufulan" oo kaliya laga soo gali karo xafiiska guud xilliga shaqadu socoto. **Dhammaan booqdayaashu waxay u baahan yihiin inay ka soo galaan xafiiska guud si ay isku diiwaangaliyaan kahor intaysan booqan aag kale oo dugsiga leeyahay.**

Booqdayaasha, waalidiinta, masuulada, qoysaska iyo ardayda dhismaha u yimi inay galaan, waa inay:

- Yimaadaan xafiiska guud.
- Soo maritaanka xafiisku waa shardi sababo badbaado iyo ammaan dartood.

***Fadlan ogow:** Dhammaan daryeelayaasha waa loo oggol yahay inay ardayda keenaan Pratt. Waxaanu codsanaa in **DHAMMAAN booqdayaasha/daryeelayaasha ay dhismaha dibadda joogaan ugu dambayn 8:15 gh.** Sidoo kale fadlan ogow, daryeelayaasha loo oggolaan maayo inay dhismaha joogaan haddaysan xaalad gurmud ah jirin wixii ka dambeeya 2:00 gd. Daryeelayaasha waxa waajib ah inay horay u sii ogaysiiyaan xafiiska imaanshahooqa si markaa ardayga loogu sii diyaariyo xafiiska guud.

OGAYSIISYADA iyo SIYAADAHA MPS EE SANADLAHA AH

Si aad u akhrido siyaasad gaar ah iyo si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Siyaasadaha & Qawaaniinta MPS, fadlan booqo bartan: <https://mps.municipalcodeonline.com>

Siyaasadda 5000: Siyaasadda

- Xaadiritaanka Ardayda (5100)
- Xeerarka iyo Nidaamyada Xaadiritaanka (5100A)
- Filashooyinka iyo Wax-ka-qabadyada Xaadiritaanka (5100B)
- Anshaxmarinta iyo Habdhaqanka Ardayga (5200-5259)
- Jaangoynaha Habdhaqanka iyo Xeerka Anshaxa (5200)
- Mamnuucidda Xoogsheedka iyo Bahdilka (5201)
- Siyaasadda Aaladda Elektarooniga ah ee Shakhsiyeed ee Ardayga (5210)
- Siyaasadda Baarbaarista Ardayda, Khaanadaha, Miisaska, iwm. (5680)
- Isticmaalka Sigaarka (5220-5220B)
- Daryeelka Ardayda (5600-5699)
- Mamnuucidda Dhibaataaynta iyo Qalalaasaha (4002)

OGAYSIISYADA SANADKII EE KU SOCDA QOYSASKA: Waxa dhici karta inaad ka codsato nuqul ah ogaysiisyada soo socda xafiiska.

1. Ogaysiiska Taleefanka Gacanta
2. Macluumaadka Caafimaadka, Isticmaalka iyo Isticmaalka Xun ee Kiimikada
3. Ogaysiiska Hubinta Dambi La'aanta ee ku socda Waalidiinta
4. Ogaysiiska FERPA (Shaacinta Macluumaadka iyo Diiwaanada Ardayga)
5. Isticmaalka Internetka & limeylka - Ogaysiiska Waalidka
6. Xuquuqda McKinney Vento (Ingiriisi, Hmong, Soomaali, Isbaanish)
7. Sii Daynta Warbaahinta & Yearbook (Foom 2010)
8. Ogaysiiska Diiwaanada Waxbarashda Gaarka ah
9. Imtixaanista: Ogaysiiska Imtixaanista Gobolka oo Dhan ee Waalidka & Foomka DIIDMADA
10. Ogaysiiska Siyaasadda Fayoaqabka

Caafimaadka iyo Badbaadada Deegaanka: <https://facilities.mpls.k12.mn.us> Websaytkooda waxa ku jira macluumaadka soo socda:

- Jadwalka Codsiga Cayayaan-dilaha/Harame-dilaha
- Xeerka Ogaanshaha Xuquuqda Waalidka
- Ogaysiiska Hirka Raadiyowga
- Ogaysiiska Asbestos ee Sanadkii
- Badbaadada Dabka